## U qalmida Katanaasulida

Qofka waa in uu kasoo baxo dhammaan shuruudaha soo socda:

- Noqotid macamiil u qalma Maamulka Naafooyinka Koriinka ee RCW 71A.10.020(5) kasta.
- Qabtid naafo sida waafaqsan shuruuda lagu qoray Qaanuunka Dammaanada Bulshada.
- Codsatid daryeel adeegaha muddada-dheer ah/caawimaada Caafimaadka (Medicaid) oona xaqiijisid dakhli aan dhaafin 300% ee ah heerka dheefta dowlada caadiga ah ee SSI.
  - Haddii uu ilmo yahay dakhliga waalidka iyo illooyinka kale waa kuwo aan la tixgelin
  - Haddii uu yahay qof weyn oo la nool xaas/nin, dakhliga xaaska/ninka iyo illooyinka kale ma ahan kuwo la tixgeliyo.
- Haysatid illooyin dhaqaale kayar $2,000 ama kujirtid barnaamijka Apple Health ee loogu talogalay Shaqaalayaasha qabba Naafooyinka (HWD).
- Kasoo baxdid heer daryeelka lagu bixiyay gudaha Xarunta Daryeelka Dhexdhexaadka ah ee loogu talogalay Dadka qabba Naafooyin Caqliga ah (ICF/IID) sida looga xadidey dhinaca qiimeynta Maamulka Naafooyinka Koriinka.
- Qorshaha adeega qofka-kusaabsan (PCSP) wuxuu muujinayaa sida baahooyinka caafimaadka qofka, ammaanka, iyo baxnaaniska loogu buuxin karo gudaha bulshada ee ah adeega katanaasulida bilaha ah iyo/ama ilaalinta.
- Aqbashid in aad oggolaanaysid adeegaha kusalaysan-bulshada iyo guriga bedelkii aad oggolaan lahayd ICF/IID.
- Loogu talogalay keliya CIIBS, qofka sidoo kale waxaa khasab ku ah in:
  - Ahaadaan da'da 8 illaa 17 wixii kusaabsan isqorida bilaabida ah (loogu adeegay tooska da'da 20);
  - Noqdaan kuwo looga qiimeeyay si biloow ah khatar sareysa ama adag oo meelayn dibada-ka-ah guriga midaas oo ay sabab u tahay dhaqamo dhib baddan; iyo
  - Lanoolyihiin qoys oggolaanaya in uu kaqayb galo barnaamijka CIIBS.


## Helida Katanaasulida

Codsi isqorid ah, ama loogu bedelanayo katanaasulid bedel ah ayaa la samayn karaa wakhti kasta. Weydii maamulaha xogta kiiska (CRM). Haddii aan joogin maamulaha xogta kiiska, ku dhaaf fariin khadka Adeega Lacag-La'aanta ah ee lagu qoray hoosta Xafiisyada Gobolka ama ugu soo dir codsiga si toos-ah internetka cinwaankan **www.dshs.wa.gov/dda/service-and-information-request**. Kasoo bixida shuruuda adeega ee loogu talogalay katanaasulida aan dammaana qaadin helida adeegaha katanaasulida. Katanaasulid kasta waa mid ku xadidan tirada dadka loo adeegi karo. Maamulka Naafooyinka Koriinka wuxuu haystaa awood uu ku xadido isqorida la isku qoro katanaasulida kusalaysan helida maal-gelin loogu talogalay kaqayb galayaasha katanaasulida cusub.

## Xuquuqaha Maamulka Dhagaysiga

Qofkasta wuxuu xaq u leeyahay in uu helo maamul dhagaysi oo ah mid kasta oo kusaabsan qaraarada soo socda ayada oo aan la eegayn barnaamijka ama adeega:

- U qalmida Maamulka Naafooyinka Koriinka la diiday, la joojiyey ama Maamulka Naafooyinka Koriinka uu sameeyo ficil dib u dhigid aan macquul ahayn oo kusaabsan codsigaaga; ama
- Nooca ama tirada adeega laguu oggolaaday in aad heshid; ama
- Diidis, dib u dhimis, ama joojinta adeegaha; ama
- Diidis doorashada adeega ah ee uu diido bixiyaha adeega; ama
- Haddii laguu guuriyo deegaan kale, midkaas oo aan ahayn mid uu qofka doortay; ama
- Diidista Maamulka Naafooyinka Koriinka uu diido in uu u hoggaansamo codsiga ah in aanan oggaysiisyo loo dirin qofkale; ama
- Kasaarid lagaa saaro barnaamijka katanaasulida; ama
- Diidis ah codsigaaga lagu helayo adeegaha ICF/IID bedelka adeegaha katanaasulida; ama
- Maamulka Naafooyinka Koriinka (DDA) uu go'aansado in adeegaha lagu helo katanaasulida hadda ahi ay kasoo baxayso baahooyinka caafimaadka iyo daryeelka oona qofka diido; ama
- Qof qiimeyn loogu sameeyay in uusan u baahnayn heerka daryeelka ICF/IID; ama
- Qof qiimeyn loogu sameeyay in uusan kasoo bixin u qalmida CIIBS.




Si toos ah internetka nooga soo booqo halkan:
*dshs.wa.gov/dda/service-and-information-request*

Ka raadi xafiiska halkan:
*dshs.wa.gov/DDA/dda/find-an-office*

Nasoo wac:

| Degmooyinka | Teleefoonka iyo limaylka |
|---|---|
| Chelan, Douglas, Ferry, Grant, Lincoln, Okanogan, Pend Oreille, Spokane, Stevens | (800) 319-7116 R1ServiceRequestA@dshs.wa.gov |
| Adams, Asotin, Benton, Columbia, Franklin, Garfield, Kittitas, Klickitat, Walla Walla, Whitman, Yakima | (866) 715-3646 R1ServiceRequestB@dshs.wa.gov |
| Island, San Juan, Skagit, Snohomish, Whatcom | (800) 567-5582 R2ServiceRequestA@dshs.wa.gov |
| King | (800) 974-4428 R2ServiceRequestB@dshs.wa.gov |
| Kitsap, Pierce | (800) 735-6740 R3ServiceRequestA@dshs.wa.gov |
| Clallam, Clark, Cowlitz, Grays Harbor, Jefferson, Lewis, Mason, Pacific, Skamania, Thurston, Wahkiakum | (888) 707-1202 R3ServiceRequestB@dshs.wa.gov |

*Dadka u baahan taageero lagu taageero maqalka ama xiriirka waxay wici karaan Adeega Xoojinta Xiriirka Teleefoonka Washington ayaga oo garaaca 7-1-1 ama 1-800-833-6388 (TTY).*

Washington State Department of Social & Health Services
*Transforming lives*

DSHS 22-1755 SM (3/18) Somali

# Katanaasulida Taageerada Dhaqanka Gudaha-guriga ah ee Xoojinta Carruurta

### Ka ahaada dhinaca Maamulka Naafooyinka Koriinka



Washington State Department of Social & Health Services
*Transforming lives*

# Dulmarka Katanaasulida

Waaxda Adeegaha Caafimaadka iyo Bulshada qaybta Maamulka Naafooyinka Koriinka (DDA) waxay leedahay shan barnaamij Katanaasulid Caawimaad caafimaad (Medicaid) oo ah Adeeg Kusalaysan-Guriga iyo Bulshada (HCBS). Katanaasul kasta wuxuu bixiyaa adeego gaar ah si looga soo baxo baahooyinka ammaanka iyo caafimaadka gudaha bulshada ah. Katanaasulida Taageerada Dhaqanka Gudaha-guriga ah ee Xoojinta Carruurta (CIIBS) wuxuu bixinayaa adeego kaladuwan marka aan laga helin tooska ilooyin kale (ceymiska khaaska ah, Caawimaada caafimaadka (Medicaid), iskuul, iwm.)

Katanaasulida Taageerada Dhaqanka Gudaha-guriga ah ee Xoojinta Carruurta (CIIBS) waxay taageeraysaa dhallinyarada ku sugan khatar meelaynta dibada-guriga-ah oo sabab u ah dhaqamada dhibaatada leh. Habka CIIBS wuxuu kulug leeyahay gunaanadka qorsheynta iyo taageerada dhaqanka wanaagsan ee qoyska-kusaabsan. Katanaasulida Taageerada Dhaqanka Gudaha-guriga ah ee Xoojinta Carruurta (CIIBS) **waxay u adeegtaa carruurta ay da'doodu tahay 8 illaa 20**.

Haddii baahida qiimeynta lagu sameeyay adeegaha ay dhaafto baaxada adeega lagu bixiyay hoosta Katanaasulida Taageerada Dhaqanka Gudaha-guriga ah ee Xoojinta Carruurta, Maamulka Naafooyinka Koriinka (DDA) wuxuu samayn doonaa hal ama wax ka baddan oo dadaalada soo socda ah si aad uga soo baxdid baahooyinka caafimaadka iyo daryeelka:

- Aqoonsatid taakulooyin dabiici dheeraad ah;
- Biloowdid ka reebid xeerka lagu helo adeegaha aan-katanaasulida ahayn ee la heli karo kuwaas oo aan ku jirin Katanaasulida Taageerada Dhaqanka Gudaha-guriga ah ee Xoojinta Carruurta ee aan ahayn taakulooyinka dabiiciga ah;
- Lagu siiyo fursad lagu codsado katanaasulida bedelka ah midaas oo ay la socoto adeegaha loo baahanyahay;
- Lagu siiyo meelayn ku saabsan Xarunta Daryeelka Dhex-dhexaadka ah ee loogu talogalay Dadka qabba Naafooyin Garaadka ah (ICF/IID).

Haddii midna doorashooyinka kor ku qoran kasoo bixin baahooyinka caafimaadka iyo daryeelka, Maamulka Naafooyinka Koriinka waxaa dhici karta in ay joojiso u qalmitaanka katanaasulida. Haddii lagaa joojiyo katanaasulida, qofka waxaa dhici karta in uu weli u qalmo adeego Maamulka Naafooyinka Koriinka ah (DDA) oo aan-katanaasulida ahayn.

# Adeegaha Katanaasulida

U isticmaal buuggyarahaan si aad ugu qorshaysatid qiimeynta sannadlaha ah. Maamulaha xogta kiiska (CRM) wuxuu sharxi doonaa adeegaha iyo shuruudaha, wuxuuna qori doonaa adeegaha lagu doortay gudaha qorshaha adeega qofka-kusaabsan (PCSP). Qaar kamid ah adeegaha waxay u baahanyihiin muraajaco iyo oggolaansho kahor inta aadan qaadanin. Kala hadal CRM-kaaga waxyaabaha kusaabsan nooca macluumaada loogu baahanayo oggolaansho hore. Adeegaha ku jira afarta qaybood waxaa kamid ah:

- *Adeegaha bulshada* – waxay kor u qaadaan kaqayb galka macamiilka iyo dhexgalka bulshada
- *Adeegaha xirfadeed* – adeegaha taakulada laga bixiyo dhinaca xirfadlayaal qandaraas lala galo
- *Adeegaha daryeel bixinta* – taakulooyin la siiyo kaqayb galayaasha iyo daryeel bixiyayaashooda
- *Badeeco iyo adeego* – qalab, alaab iyo adeego khaas ah oo la siiyo kaqayb galayaasha



***Isticmaal khaanadaha la doorto si aad u tustid maamulaha xogta kiiska (CRM) adeegaha aad danaysid:***

## Adeegaha Bulshada

- ☐ **Gaadiid** – Magdhow lasiiyo bixiyaha gaadiidka aan ahayn-mid caafimaad ee loogu baahanyahay in lagu helo adeegaha katanaasulka lagu xadiday gudaha qorshaha adeega PCSP.

## Adeego Xirfadeed

- ☐ **Adeegaha xasilinta caafimaadka hab dhaqanka** – adeego lagu caawinayo laguna taageerayo inta lagu guda jiro dhibaatooyinka caafimaadka hab dhaqanka. Midaan waxaa kamid ah taageerada hab-dhaqanka wanaagsan iyo latalinta, iyo adeegaha sariirta ka weecinta dhibaatada.
- ☐ **Adeegaha xasilinta caafimaadka hab dhaqanka – adeegaha sariirta ka weecinta dhibaatada** – adeego hab dhaqan iyo deegaan kumeel gaar ah kuwaas oo dadka halista ugu jira istaagida shaqada maskaxda oona halis ugu jira isbitaal dhigid cudurka miyirka ah.
- ☐ **Taageerada hab-dhaqanka wanaagsan iyo latalinta** – taageerooyin lagu sheegayo baahooyinka caafimaadka hab-dhaqanka. Kuwaan waxaa kamid ah soo dhexgalyo toos ah oo lagu xoojinayo dhaqamada wanaajinaya tayada nolosha iyo kudarida bulshada.
- ☐ **Qiimeynta khatarta** – qiimeyn rabsho, daba gelid, rabsho galmo, ama hab dhaqan weerarid ah si loo xadido baahida loogu talogalay adeegaha daaweynta ama caafimaadka, nafsaaniga ah.
- ☐ **Tababar iyo latalin qoys/shaqaale** – tababar xirfadeed iyo latalin la siiyo bixiyayaasha adeega tooska ah iyo qoyska si baahooyinka loogaga dhabeeyo sida ugu wanaagsan. Heliada latalin.

## Adeegaha Daryeel bixinta

- ☐ **Nasasho** – nasasho muddo-gaaban oo la siiyo dadka la nool oona daryeela macaamiisha.

## Alaabta iyo Adeegaha

- ☐ **Tiknaloojiyada caawimaada** – waxyaabaha iyo tababarka loo isticmaalo in lagu horumariyo ama lagu sii wado awoodaha shaqada qofka.
- ☐ **Laqab-sashada deegaanka** – hagaajin muuqaal oo lagu sameeyo waxyaabaha guriga lagama maarmaanka u ah ee khuseysa qofka kusii noolaanaya gudaha bulshada.
- ☐ **Dhar khaas ah** – dhar aan-xannibaad lahayn kuwaas oo loo sameeyay si waafaqsan baahida naafada.
- ☐ **Qalab iyo alaab caafimaad ahaan khaas u ah** – qalabka iyo alaabta caafimaad ahaan lagama-maarmaan u ah kuwaas oo aan lagu helin hoosta Caawimaada caafimaadka (Medicaid) (Daryeelka Apple) (Apple Care).
- ☐ **Qalab iyo alaab daaweyn** – Qalabka loo baahanyahay si loo fuliyo daaweynta ama qorshaha taageerada hab-dhaqanka wanaagsan.
- ☐ **Hagaajinta baabuurka** – kuu saamaynta baabuur kasoo bixi kara baahooyinkaaga iyo dhexgalkaaga bulshada.